[redacted]


# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad | Muqdisho, 10 Luulyo 1976. | L. 1 R 7

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

W. M.

SAXID QALAD

Faafinta Rasmiga ah ee lambarkeedu yahay 2 r 5 ee soo baxday 18 Maajo 1976, bejkeeda 334 oo uu ku qoran yahay Xukun go'aan Maxkamdeed kuna soo baxday Maxamed Sheekh Axmed, waa in loo akhriyo sida soo socota:

Saciid Maxamed Sheekh Axmed.

### BOGGA LABAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 20 Maajo 1976, L. 64 — *Abuurid Safaaradda JDS ee Islaam Abaad (Bakistaan)* Bogga 423

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 29 Maajo 1976, L. 65 — *Abuurid Wakiilka Joogtada ah ee JDS, Geneva (Switzerland)* » 433

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 18 Abriil 1976, L. 66 — *Gaashaanle Caydiid Cabdullaahi Ilkaxanaf oo lagu magacaabay La-taliyaha Garyaqaanka Guud ee Dawladda* » 434



**Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho**

[redacted]



XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAN-KA, 2 Luulyo 1976, L. 67 — *Billad Maar ah ee Hawl-karnimo Jaalle Cumar Xasan Aadan iyo Jaalle Maxamed Yuusuf Geesdheer* » 435

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAN-KA, 2 Luulyo 1976, L. 68 — *Billad Maar ah ee Wad-daninimo Jaalle Cali Faarax Axmed* » 436

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAN-KA, 2. Luulyo 1976, L. 69 — *Billad Maar ah ee Ka-caannimo Jaalle Xaliimo Cartan Cumar* » 437

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAN-KA, 20 Juunyo 1976, L. 70 — *Magacaabid Dr. Maxa-med Awees Afrax, Garyaqaanka Guud ee Dawladda* » 438

---

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 31 Maajo 1976, — *Lumidda Buugga Keyda L. 8415, ku qoran Cabdulle Muuse Muuddey, lacag dhan 40.545,30 (179)* » 439

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 31 Juunyo 1976, — *Lumidda Buugga Keyda L. 9284 ku qoran lacag dhan 3.310 - kuna qoran Xuseen Diiriye Aadan (180)* » 440

SHINEMA HODAN, 22 Maajo 1976, — *Ogeysiis isu imaa-tin Caadi ah (181)* » 441

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 23 Maajo 1976, — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad (182)* » 442

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 23 Maajo 1976, — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad (183)* » 443

MAXKAMADDA GOBOLKA BARI, (Boosaaso) 10 Jannaa-yo 1976 — *Lumid Jeeg Wareega L. 10710, Sh. So. 1.216,70 uu leeyahay Ibraahim Maxamed Canshuur (183/Bis)* » 444

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, 11.1.1976 — *Lumid Jeeg Wareega L. 5429 Sh. So. 1.000 ay leedahay Faaduma Maxamed Caynaanshe (183/Bi)* » 445

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER L. 64 ee 29 Maajo 1976.**

**Abuurid Safaaradda J.D.S. ee Islam Abaad (Bakistaan).**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ANNAGOO ARAGNAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejinaysay Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga ay ku dhisan tahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya oo la socda Ruuxa Kacaanka;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, Lambar 9 ee 8dii Sebtembar 1971, iyo Sharciga Lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abriile 1973 *(Foreign Service Law);*

ANNAGOO TIXGELINAYNA: Talooyinkii ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Waxaa la guddoomiyay in la abuuro Safaarad Soomaaliyeed, saldhiggeeduna noqon doono Magaalada Islam (Bakistan).

Muqdisho, 29 Juunyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

**XEER L. 65, ee 29 Maajo 1976.**

**Abuurid Wakiilka Joogtada ah ee J.D.S. Geneva (Switzerland).**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ANNAGOO ARAGNAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejinayay Maamulka Sharciga dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga ay ku dhisan tahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya oo la socda Ruuxa Kacaanka;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda lambar 9 ee 8dii Sebtembar 1971, iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 16kii Abriile 1973 *(Foreign Service Law);*

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga ay ku dhisan tahay Dawladda, Sharci lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962;

ANNAGOO TIXGELINAYNA: Talooyinkii ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Waxaa la guddoomiyay in la abuuro Xarunta Wakiilka Joogtada ah ee Soomaaliya u jooga Xafiiska Qarammada Midoobay iyo Hay'adaha Gaarka ah, Geneva (Somali Permanent Representative to the United Nations Office and un Specialised Agencies at Geneva).

Muqdisho, 29 Maajo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER L. 66 ee 18 Abriil 1976.

Gaashaanle Caydiid Cabdullaahi Ilkaxanaf oo lagu magacaabay La-taliyaha Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka Oktoobar 21, 1969;

ISAGOO ARKAY: Dekereetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka tirsigeedu yahay 02333/73 ee 2dii Sebtembar 1973, kuna saabsan magacaabida Garsoorayaal Maxkamadda Ciidanka Qalabka Sida.

ISAGOO ARKAY: Xeerka tirsigiisu yahay 18 ee 29 Jannaayo 1976 kuna saabsan qaabka cusub ee Xafiiska Garayaqaanka Guud ee Dawladda.

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii Guddoomiyaha Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga ee G.S.K. iyo Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

WUXUU XEERAYAA

1. Marka laga bilaabo 1da Abriil 1976 Gaashaanle Ceydiid Cabdullaahi Ilkaxanaf oo ka tirsan Ciidanka Boliiska, waxaa lagu magacaabay La-taliyaha Garyaqaanka Guud ee Dawlada ee M.G.S.K.

2. Gaashaanle Ceydiid Cabdullaahi Ilkaxanaf marka laga bilaabo 1da Abriil 1976 wuxuu yeelan doonaa wixii xuquuq ay leedahay jagada lagu magacaabay iyo gunnada xirfadda ee Jaamiciyiinta.

Muqdisho, 18 Abriil 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA EE
WASAARADDA MAALIYADDA
*(Cabduraxmaan Nuur Xirsi)*

MADAXWEYNAHA G. S. K.
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 154*
*Muqdisho, 29 Maajo 1976*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

**XEER L. 67 ee 2 Luulyo 1976.**

**Billad Maar ah ee Halwkarnimo, Jaalle Cumar Xasan Aadan iyo Jaalle Maxamed Yuusuf Geesdheer.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYAY: Dadaalka, hawlkarnimada iyo shaqada dheeraadka ah oo ay qabteen jaallayaasha hoos ku qoran, iyagoo kaalin lama illoowaan ah ka geysanaya gargaarka abaarta ee Degmada Caabud Waaq;

MARKUU ARKAY: Lagama maarmaan inay tahay in loo aqoonsado jaallayaashan xusuusta iyo ammaanta ay ummaddooda ka muteysteen.

WUXUU GUDDOONSIIYEY

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE HAWLKARNIMO Jaallayaasha hoos ku qoran:

1. Cumar Xasan Aadan iyo
2. Maxamed Yuusuf Geesdheer.

Muqdisho, 29 Luulyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

**XEER L. 68 ee 2 Luulyo 1976.**
**Billad Maar ah ee Waddaninimo, Jaalle Cali Faarax Axmed.**

MADAXWEYNAHA G. S. K.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 65 ee 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Waddaninimada qaayaha leh, geesinnimaduna ku dheehan tahay iyo dhibaatada weyn uu u galay Jaalle Cali Faarax Axmed badbaadada magaca iyo Sharafta Ummaddiisa;

MARKUU TIXGELIYEY: Gaar ahaan isku kalsoonida uu muujiyey Jaallahaas iyo hufnaantiisa isagoo ku soo celiyey hantida Dadweynaha Soomaaliyeed qalab qiimo leh uu siduu doono ugu dhaqmi karay cid ogaan lahaydna aanay jirin, sababta u diiddayna ay tahay Waddaninimadiisa oo heer sare gaartay;

MARKUU ARKAY: Lagama maarmaan in ay tahay in qofka Waddaniga ah taariikhdiisa inaan la lumin, loona aqoonsado Sharafta iyo Xusuusta uu ummaddiisa ka mudan yahay;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinat ee M.G.S.K. (Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada).

WUXUU GO'AAN KU GAARAY:

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay Jaalle Cali Faarax Axmed BILLAD MAAR ah ee Waddaninimo.

Muqdisho, 29 Juunyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER L. 69 ee 2 Luulyo 1976.
Billad Maar ah ee Kacaannimo, Jaalle Xaliimo Cartan Cumar.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 65 ee soo baxay 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Sida kacaannimada leh ee Jaalle Xaaliimo Cartan Cumar oo ka shaqaysa Wakaaladda Batroolka Soomaaliyeed ay uga hortagtay maamulxumada iyo hoobka lagu hayay xoolaha dadweynaha Soomaaliyeed, uguna sugtay gacanta caddaaladda dadkii mas'uulka ka ahaa boobkaasi;

MARKUU TIXGELIYEY: In tallaabada Jaalle Xaliimo Cartan Cumar ay tahay mid aan marnaba ka suurtoobeynin qof aan kacaan ahayn oo meel sare ka gaarin garaadka siyaasiga, fahminna in ay waajib ku tahay qofka waddaniga ah inuu Bulshada ka qabto kan fayla goynaaya, weji kastaba ha ku timaadee feylagoyntiisu, socodka dheer ee loogu jiro dhismaha aayaha dambe ee Ummadda Soomaaliyeed, isagoo innaba u aaba yeelin eedda uu falkiisaasu u soo jiidi karo;

MARKUU ARKAY: Inay tahay lagama maarmaan in qof kasta wuxuu u galo Dadkiisa iyo Dalkiisa looga abaalgudo, xusuus dhaxalgal ahna looga reebo;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee M.G.S.K. (Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada).

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay Jaalle Xaliimo Cartan Cumar BILLAD MAAR AH EE KACAANNIMO.

Muqdisho, 29 Juunyo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER L. 70 e 20 Juunyo 1976.
Magacaabid Dr. Maxamed Awees Afrax, Garyaqaanka Guud ee Dawldda.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 14 ee 3 Juunyo 1962 beddelaaddii ka dambeeyay kuna saabsanaa Qaynuunka Maamulka Dawladda;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 29 ee 1 Abriil 1970 iyo beddelaaddii ka dambeeyay kuna saabsanaa shaqaalaha Dawladda iyo sharciga lamb. 14 ee 31 Juunyo 1971;

ISAGOO ARKAY: Go'aanka lamb. GSK/S/21/6-626 ee 3 Jannaayo 1976 ka soo baxay Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lamb. 95 ee 27 Juunyo 1976 oo lagu magacaabay Dr. Maxamed Awees Afrax Ku-xigeenka Garsooraha Guud ee Dawladda darajadeeduna ahaa A/3;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lamb. 18 ee 29 Jannaayo 1976 kuna saabsan Qaabka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda qodobkiisa 8aad;

ISAGOO GARTAY: In Dr. Maxamed Awees Afrax loo magacaabo Garayaanka Guud ee Dawladda.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo bisha Juunyo 1da Dr. Maxamed Awees Afrax waxaa loo magacaabay Garyaqaanka Guud ee Dawladwa isagoo buuxinaaya jagada lambarkeedu yahay 1.6001 darajadeeduna tahay A/2.

Qodobka 2aad

Jaalle Dr. Maxamed Awees Afrax marka laga bilaabo bisha Juunyo 1da 1976 wuxuu xaq u yeelan doonaa mushaaharada iyo gunnooyinka uu leeyahay Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

XOGHAYAHA DAWLADDA EE
WASAARADDA MAALIYADDA
*(Dr. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 238*
*Muqdisho, 22 Juunyo 1976*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

MADAXWEYNAHA G. S. K.
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

# BOGGA SEDDAXAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga Ganacsiga Ummadda (eeg 04132) wuxuu ogaaday in ay shaqadiisa tahay;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 L. 2; lumidda buugga keyda lam. 8415 ku qoran Cabdulle Muuse Muuddey, buuggaas keyda oy ku qoran tahay Sh. So. 40.545,30.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo buugga keyda oo ku qoran Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay ka dib markii ay 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cabdulle Muuse Muuddey ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 31 Maajo 1976.

GUDDOOM. MAXK. G. BANAADIR
*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Barre)*

*(179)*

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga Ummadda (eeg 04568), wuxuu ogaaday inay shaqadiisa tahay;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 L. 2; lumidda buugga keyda lam. 9284 ku qoran tahay lacag dhan Sh. So. 3.310 kuna qoran Jaalle Xuseen Diiriye Aaden.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo buugga keyda oo ku qoran Jaalle Xuseen Diiriye Aaden ka dib markii 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Xuseen Diiriye Aaden ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugayo muddada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 17 Juunyo 1976.

GUDDOOMIYAHA MAXK. G. BANAADIR

*(Dr. Cabdiraxmaan Sheekh Maxamed)*

*(180)*

SHINEMA ««HODAN» S.p.A.

Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'sumaalkeduna yahay Sh. So. 300.000

## *OGEYSIIS ISU IMAATIN CAADI AH*

Shirkadda Shinema «Hodan oo saldhiggeedu yahay Muqdisho waxay ogeysiinaysaa dadka qaybaha ku leh Shirkadda in ay ka soo qayb galaan shir guud oo caadi ah laguna qaban doono saldhigga Shirkadda, maalinta 15ka Bisha Juun 1976, 10 subaxnimo, waxaana laga hadli doonaa wax-yaalaha soo socda:

1) Xogwarranka Guddiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha.
2) Hordhigga Xaashida Miisaaniyadda, Dheefta iyo Khasaarada ee ee 31.12.1975 iyo wixii go'aan ah ee la xiriira.
3) Magacaabidda ama ku sii magacaabidda Maamulka Guud.
4) Magacaabidda ama ku kii magacaabidda Guddiga Baarayaasha.

Waxaa xaq u leh in ay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku qoran buugga shirkadda, ilaa 5 beri k hor maalinta la isu imanayo.

Muqdisho, 22 Maajo 1976.

4) uBHn ETAOIN-g-o SHRDLU shrdlu

GUDDIGA MAAMULKA GUUD

*(181)*

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

Xeer Nidaamiye Lambar 90 ee 23.5.1976

*Heerka Sarrifka Lacgaha Qalaad*

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD

EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA inuu caddeeyo mar walba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saamaynaya ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON: In horay loo qaatay go'aan degdeg ah Lr. 208 ee 23.5.1976 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofeembar, 1968 uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 23.5.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqrraadiga Soomaaliya.

| *Lacagta qalaad* | | *Heerka iibsashada oo Sh. So. ah* | *Heerka gadidda oo Sh. So. ah* |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 11.3694 | 11.5968 |
| DM. | 1.00 | 2.4441 | 2.4930 |
| LIT. | 136.00 | 1.0000 | — |
| LIT. | 133.45 | — | 1.0000 |
| F.FR. | 1.00 | 1.3276 | 1.3542 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5171 | 2.5674 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 23 Maajo 1976.

SACIID MAXAMED CALI
*Agaasimaha Guud*

CUMAR AXMED CUMAR
*Guddoomiyaha*

(182)

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

## Xeer Nidaamka Lambar 91 ee 2.6.1976

*Heerka Sarrifka Lacgaha Qalaad*

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD

EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA inuu caddeeyo mar walba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saamaynaya ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON: In horay loo qaatay go'aan degdeg ah Lr. 209 ee 2.6.1976 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofeembar, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 2.6.1976 waxaa go'aankan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| *Lacagta qalaad* | | *Heerka iibsashada oo Sh. So. ah* | *Heerka gadidda oo Sh. So. ah* |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 11.0283 | 11.2489 |
| DM. | 1.00 | 2.4050 | 2.4531 |
| LIT. | 136.17 | 1.0000 | — |
| LIT. | 133.45 | — | 1.0000 |
| F.FR. | 1.00 | 1.3276 | 1.3542 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5171 | 2.5674 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 2 Juunyo 1976.

SACIID MAXAMED CALI
*Agaasimaha Guud*

CUMAR AXMED CUMAR
*Guddoomiyaha*

*(183)*

MAXKAMADDA GOBOLKA BARI (BOOSAASO)

*AMAR DEKEREETO*

Jaalle Ibraahim Canshuur, wuxuu Maxkamadda horkeenay Arji uu ku dalbanaayo in Jeegga Wareega ee lamb. yahay 10710, lacagtiisuna tahay Sh. So. 1216,70 uu ka lumay kano soo baxay Bankiga Ganacsiga, Laanta Boosaaso, taariikhdu markay ahayd 28.4.1975.

Bankiga Ganacsiga Ummadda wuxuu Maxkamadda horkeenay warqad lamb. 000036 taariikh 7.1.1976, uu ku caddeynayo in uu lumay jeegga lambarkiisu kor ku qoran yahay.

MARKII AAN ARKAY: Waxyaalaha kor ku qoran, markii aan arkay Qod. 27 Xeerka lamb. yahay 2 soona baxay 9.9.65 iyo qod. lamb. yahay 69 ee isla Xeerkaa.

WAXAA LA AMRAYAA

1) In uusan socon karin jeegga lambarkan kor ku qoran.

2) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

3) In lacagtaas ku qoran jeegga w. Bankigu u cusbooneysiiyo Arjilaha magaciisu kor ku qoran yahay, shan iyo toban (15) casho kaddib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, haddana wax is-hortaaga jirin.

Bankiga Ganacsiga Ummaddu waa in uu jeegga la cusbooneysiinayo gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama cid wakaalad Sharci ah ka sidata.

Boosaaso, 10 Jannaayo 1976.

GARSOORAHA MAXK. G. BOOSAASO
*(Sheekh Axmed Cabdulle Habarwaa)*

*(183/Bis)*

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

*AMAR DEKEREETO*

Jaalle Faadumo Maxamed Caynaanshe waxay Maxkamadda horkeentay Arji ay ku caddeyneyso in Jeeg Wageega ah kuna qoran yahay magaceedu, lamb. 5429, lana sameeyey taariikhdu markay ahayd 15.5.75 ka lumay.

Bankiga Ganacsiga, Laanta Hargeysa wuxuu Maxkamadda horkeenay warq. J. W. lr. 5429 kuna qoran tahay lacag dhan 1.000, jeeggaas oo ku qoran Faadumo Maxamed Caynaanshe.

MARKII AAN ARKAY: Waxyaabaha kor ku qoran iyo markii aan arkay qod. 27 Xeerka lamb. yahay 2 soona baxay 9.9.65 iyo qod. 69 isla xeerkaas.

WAXAA LA AMRAYAA

1. In uu socon karin jeegga lamb. kor ku qoran yahay laga bilaabo maanta.

2. In lagu qoro amarkaas Faafinta Rasmiga ah.

3. In lagactaas ah Sh. So. 1.000 bankigu siiyo arjiilaha magaciisu ujeeddada ku qoran yahay, muddo ku siman shan iyo toban (15) casho ka dib, marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Hargeysa, 11 Jannaayo 1976.

GUDDOOMIYAHA MAXK. G. HARGEYSA

*(Jaalle Xasan Xaaji Yuusuf)*

*(183/Bis)*